



Degmada San Diego

WAAXDA CAAFIMADKA IYO TAYADA DEEGAANKA QAYBTA CUNTADA IYO GURYAHA



HAGAHA HAWL-WADEENKA – CAYAYAANKA BARANBARADA: SIDEE LOOGA JAWAAB- CELIYAA?

Qeybta Cuntada iyo Guryaha (The Food and Housing Division, FHD) ee Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka (DEHQ) waa wakaalada/hay'adda maxaliga ah ee mas'uulka ka ah kormeerka tas-hiilaadka cuntada. DEHQ-FHD waxay ilaalisaa caafimaadka iyo badbaadada bulshada iyadoo barnaamijyada Badbaadada Cunnada ka fulinaysa guud ahaan Degmada San Diego. Hakinta Oggolaanshaha Ganacsiga sabao la xiriira cayayaanka baranbarada oo lagu arko meelaha muhiimka ah ee goobtaada cuntadu waa halis. Amarka lagaaga joojinayo adeega/ganacsiga cunnada waa lagama maarmaan si isla markaaba bulshada guud looga ilaaliyo khataraha caafimaad ee ka imaan kara caabuqa baranbarada. Joojinta adeegga cuntada ayaa sidoo kale adiga, hawl-wadeenka, idinka ilaalin kartaa inaad qaadaan mas'uuliyad dacwadeedka ee ku aadan sumaynta cuntada macaamiisha ee baranbarada.

Dukumeentigan hagaha ah waxa uu Maamulaha ama Qofka Masuulka Ka Ah Xarunta Cunnada ka caawin doonaa in uu sameeyo isbeddello lama huraan ah si loo yareeyo caddadka wakhtiga ay xaruntaadu u xirnaan lahayd sababo la xiriira baranbaro isla markaana loo xaqiijiyo in xaruntu si badbaado leh dib ugu bilaabi karto hawsheeda.

TALLAABOYINKA LAGU BAABI'INAYO DHAQDHAQAAQYADA BARANBARADA EE XARUNTAADA

1. Xakamaynta Cayayaanka - Si Badbaado Leh Oo Degdeg Ah U Baabi'i Dhaqdhaqaaqa Baranbarrada

Waxaan si adag ugu talinaynaa in shirkad shahaado/khibrad u leh ka-hortagga/ciribtirka cayayaanka lala xiriiro si loo ciribtiro/baabi'iyo caabuqa sababta u ah in oggolaanshahaaga ganacsi la hakiyo. In kasta oo aad isku dayi karto in aad adiga naftaada baabi'iso/ciribtirto dhibaataada, arrimaha adag sida dhaqdhaqaaqyada baranbarada waxa ay ku fiican tahay in loo daayo khabiirto/dadka khibrad u leh kuwaas oo si degdeg ah u daweyn kara xaruntaada iyo si badbaado leh, taas oo ah mida ugu muhiimsan. Kiimikooyinka loo isticmaali doono in baranbarada lagaga saaro xaruntaada aad bay u sun badan yihiin, sidaas darteed waa muhiim inaad heshiis la gasho hawl-wadeen/shirkad khibrad u leh ka hortagga cayayaanka oo shati ka haysta Gobolka California. Waxaad liisaska shirkadaha u qaabilsan xakamaynta cayayaanka ee haysta shahaado ka heli kartaa buugga adeegyada deegaankaaga.

Haddii aad horey qandaraas ugula jirtay shirkad adeeg, u wac oo u sheeg inaad u baahan tahay adeegooda si ay u yareeyaan caabuqa cayayaaneed ee ka jira xaruntaada. Shirkadda khibradda u leh ka hortagga cayayaanka ee shahaada u haysata arrintaas ayaa daawayn doonta xaruntaada, ku siin doonta dukumeentiga adeega ay kuu qabatay isla markaana ku ogeysiin doonta marka ay nabdoon tahay in dib loogu laabto dhismaha loona bilaabo nadiifinta. Marka dib-u-baaris lagu sameeyo, Takhasusle Ka Socda Waaxda Caafimaadka Deegaanka (EHS Inspector) ayaa codsan doona inuu arko dukumeentigan si loo hubiyo inay badbaado tahay in la galo xaruntaada. Kormeerayaashu ma samayn doonaan dib-u-baaris kahor inta aanad siinin macluumaadkan. Ogow in oggolaanshahaaga ganacsi aan hakinta laga qaadi doonin ilaa dhammaan dhaqdhaqaaqyada baranbarada gebi ahaanba meesha laga saaro/ciribtiro.

2. Ka Saar Baranbarooyinka Dhintay Iyo Kuwa Dhimanaya, Nadiifi Oo Daawada Nafiinta U Isticmaal

Daawaynta saxda ee ay bixiso shirkaddaada xakamaynta cayayaanka waxay yaraynaysaa duulka cayayaanka. Marka ay nabdoon tahay in dib loo soo galo xaruntaada, waa waqtigii aad nadiifin lahayd. Xaqiiji in dhammaan baranbarooyinka dhintay iyo kuwa dhimanayaba meesha laga saaro, oo ay ku jiraan daboolada ukunta ee ay wataan baranbarooyinka dheddigga ee waaweyn. In goobta laga nadiifiyo oo laga saaro dhogorta/daboolada ukunta waxay sababi kartaa dib u soo noqosho cayayaanka ee toddobaadyo kadib iyadoo weliba ah marxalad hormarsan oo baranbaro badan ah kuwaas oo ka soo badbaaday dawayntii hore ee cayayaanka. Xaqiiji in dhammaan sagxadaha ay saamaynta gaartay si fiican

loo dhaqo loona nadiifiyo. Ogolaanshaha caafimaadka goobta ganacsigaaga waxaa hakinta laga qaadi karaa oo keliya kadib marka dhammaan meelaha uu cayayaanka sameeyey la nadiifiyo oo si habboon loo jeermis-dilo.

3. Baabi'i Aagagga Dhuumashaalka Ee Cayayaanka Ka Dhalan Karo

Hadda maadaama aad si guul leh u ciribtirtay dhammaan dhaqdhaqaaqyada baranbarada oo aadna meesha ka saartay caddaynta jiritaanka cayayaanka ee goobta adiga oo isticmaalaya nadiifin iyo jeermis-dilid, waxaa muhiim ah in la qaado tillaabooyin looga hortagayo soo noqoshada cayayaanka. Meesha ka saar daldaloolada ka jira derbiyada, saqafka, armaajooyinka, ama sagxadaha kale ee xumaaday kuwaas oo noqon kara meelo mustaqbalka ka dhalan kara cayayaan isla markaana caqabad ku noqon kara xakamaynta cayayaanka. **XAQIJI INAAD SAMEYSO SIDAAS KAHOR** intaadan codsan in goobtaada dib-u-baaris lagu sameeyo.

4. Isticmaal Liiskan Hubinta Si Aad Ula Socoto Horumarkaaga Ka Hor Inta Aadan Dib U Furin Goobtaada Ganacsi

Ha codsan in goobta dib-u-baaris lagu sameeyo ilaa dhammaan qodobadan soo socda laga dhammaystiro:

- Ciribtir cayayaanka baranbarada ee nool adigoo isticmaalaya habab la ansixiyay**
Isticmaal hawl-wadeen/shirkad u qaabilsan xakamaynta cayayaanka ii shahaado/shati haysta. Xaqiiji inaad xarunta ka saartid dhammaan qashinka dheeraadka ah, wixii kartoono iyo alaab shakhsiyeed ah. Tani waxay suurtagelin doontaa in la sameeyo adeeg wax ku ool ah oo loogaga hortagayo cayayaanka waxayna ka hortagi doontaa in goobahaas ay noqdaan meelo ay baranbarada iyo cayayaanka kale ka soo faracmaan mustaqbalka.
- Gal/ku noqo xaruntaada kaliya kadib marka ay nabdoon tahay in sidaas la sameeyo; Nadiifi oo jeermiska ka dil dhammaan sagxadaha cuntada loo isticmaalo.** Waxaana ka mid ah dhammaan goobaha cuntada ee lagu arkay baranbaro nool ama dhimatay iyo meelaha gaaray sunta cayayaanka ee la isticmaaley. Waa muhiim in goobta laga saaro/nadiifiyo ugxanta/ukunta ee ay meesha kaga tageen baranbarooyinka dhintay, maadaama ugxan kasta ay ku jiri karaan ilaa 32 "ilmo" oo baranbaro ah kuwaas oo awood u leh inay ka badbaadaan xakamaynta cayayaanka ee la isticmaalay. Jabi/kala gooy meertada nololsha baranbarada.
- Gebi ahaanba ciribtir meelaha/goobaha dhuumashaalka cayayaanka**
Kormeeraha EHS ee loo xilsaaray inuu dib-u-baarista sameeyo ayaa si gaar ah u eegi doona aagga xaruntaada ee uu cayayaanku ka dhashay. Aagagga dhuumashaalka waa in la ciribtiraa. Taas kadib, baaritaan joogto ah oo dhamaystiran ayaa la samayn doonaa, cadaymo kasta oo dheeraad ah oo muujinaya inay jiraan dhaqdhaqaaqyo ah baranbarooyin nool waxay sababi doontaa in xaruntaada aan dib loo furin.
- Ha kuu diyaarsanaadaan dukumeentiyada adeega xakamaynta cayayaanka**
Kormeeraha EHS ayaa dib u eegis ku samayn doona dukumentigan si uu u hubiyo in ay nabdoon tahay in la geli karo xarunta si dib-u-baaris loogu sameeyo. Waa inuu diyaar kuu ahaadaa dukumeentiga si dib-u-baarista goobta loo sameeyo.

ILAASHO WAQTIGA IYO LACAGTAADA

Haddii aadan dhamaystirin liiska hubinta ee kor ku xusan, **HA CODSAN DIB-U-BAARIS IN LAGU SAMEEYO GOOBTAADA.** Kormeeraha EHS ee loo xilsaaray goobtaada ma awoodi doono inuu hakinta ka qaado Ogolaanshaha Caafimaadka ee Goobtaada Ganacsi ilaa dhammaan tallaabooyinka kor ku xusan laga dhammaystiro. Kormeerka/dib-u-baarista lagu celceliyo waxay kuu keeni kartaa in lagaa qaado kharashka dib u baarista.

TALLAABOYINKA KA HORTAGGA CAYAYAANKA EE DAAWEYNTA KADIB AH

Maamulaha ama Qofka Mas'uulka ah Xarunta Cunnada ayaa mas'uul ka ah samaynta qiimeynta bilowga ah iyo qiimeynta joogtada ah ee xarunta cuntada si loo hubiyo u hoggaansanaanta joogtada ah ee shuruudaha badbaadada cuntada iyo inuu shaqaalaha u tababaro ka hortagga sii ifbixitaanka cayayaanka

baranbarada ee mustaqbalka.

Si xarunta looga dhigo mid aan baranbaro lahayn, waa muhiim inaad tababarto shaqaalaha si ay si joogto ah u sameeyaan hababka soo socda:

- Kormeerida dhammaan alaabaha goobta la keeno iyo inay diidaan wax kasta oo leh calaamado muujinaya dhaqdhaqaaqa cayayaanka baranbarada
- Diiditaanka alaab kasta oo muujinaysa calaamado ah inuu jiro cayayaan si looga hortago dhaqdhaqaaqa baranbarada ee mustaqbalka
- Si joogto ah iyo si fiican u nadiifinta xaruntaada si meesha looga saaro haraaga cuntada iyo qashinka
- Si joogto ah u dayactirista iyo u hagaajinta xaruntaada si meesha looga saaro meelaha ay baranbaradu ka dhalan karto
- Si joogto ah u kormeer xaruntaada oo raadi calaamadaha muujinaya inuu jiro dhaqdhaqaaqa baranbarada
- Qandaraas la gal hawladeen/shirkad shahaado/shati haysata oo u qaabilsan xakamaynta cayayaanka